

# CODBIXIYAYAASHA AY UGU HORAYSO



*Codbixinta ma ku cusubtahay? Ha welwelin—talaabooyinkan ayaa kuu faahfaahinaya habka loo codbixiyo.*

## **TAG GOOBTAADA CODBIXINTA**

Waa in aad ka codaysaa goobta codbixinta ee laguu qoondeeyay. Badanaaba waxay ku taal meel u dhow meesha aad deggan tahay. Goobtaada codbixinta waxaad ka heli kartaa [mnvotes.org](http://mnvotes.org). Goobaha codbixinta badankoodu waa furan yihiin laga bilaabo 7da subaxnimo ilaa 8da fidnimo.

## **MARKAAD TIMAADID SAXIIX AMA ISDIIWAANGELI**

Haddii aad u diiwaangashan tahay in aad codayso, magacaagu wuxuu ku jiraa liiska codbixiyayaasha. Waxaa kaliya oo aad u baahan tahay waa in aad saxiixaaga ku qortid meesha ku xigta magacaaga. Haddii aad diiwaangashan tahay, uma baahnid in aad tustid Warqadda Aqoonsiga markaad saxiixaysid.

Haddii aadan isdiiwaangelin ka hor Maalinta Doorashada, waa in aad tustaa caddayn ah cinwaankaaga hadda. Tusaale, waxaad tusi kartaa shati dareewal ee Minnesota oo hadda ah ama Warqadda Aqoonsiga ee gobolka. Ama waxaad tusi kartaa Waraq Aqoonsi oo sawir leh uuna ku qoran yahay cinwaankaagii hore, oo ay weheliso qaansheeg cinwaankaaga hadda ah uu ku qoran yahay.

Liis ay ku qoran yihiin dhammaan noocyada Waraaqaha Aqoonsiga iyo dukumiintiyada aad keeni kartid, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org).

*waa socotaa eeg bogga gadaale...*

**Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota**  
**[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE**

## **TAARIIKHAHA 2016**

**DOORASHADA AASAASIGA**  
Talaada, 9ka Bisha 8aad (August)

**MAQNAANSHO KU CODAY**  
Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya  
23ka Bisha 9aad (September) ilaa  
7da Bisha 11aad (November).

**ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO**  
Hory isdiiwaangeli ugu dambayn  
18ka Bisha 10aad (October)  
si aad waqti u hesho Maalinta  
Doorashada.

**MAALINTA DOORASHADA**  
Talaada, 8da Bisha 11aad  
(November)

# CODBIXIYAYAASHA AY UGU HORAYSO



...ka timid horay

## CODAY

Waxaad ku codaynaysaa meel aan cidi kula joogin, codkaaguna waa qarsoodi. Ku coday qalin ama qalin rasaas, si buuxdana u buuxi goobada xigta waxaad dooratay.

Warqadda codbixinta tilmaamaha ku qoran ayaa kuu sheegaya inta musharax ee aad xafiis kasta u dooran karto. Badanaaba waxaa ku qoran 'choose one' ('mid dooro'). Xafiisyada deegaanka qaar ka mid ah waxaa ka banaanaan kara wax ka badan hal kursi ee u baahan in la buuxiyo.

Warqaddaada codbixinta waa la tirinayaa xittaa haddii aadan cod ka bixin tartan kasta ama su'aal kasta ee ku qoran warqadda codbixinta.

## WARQADDAADA CODBIXINTA LA AAD SANDUUKHA CODBIXINTA

Marka aad codayso ka dib, ku rid warqaddaada codbixinta mishiinka yaal ee lagu rido. Hubi in aad qaadatid istikarka ay ku qoran tahay "I voted" intaadan tegin.

## HORAY UGU CODAY WARQADDA CODBIXINTA MAQANAHA

Horay ayaad uga codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga laga bilaabo Jimce 23ka Bisha 9aad (September). Waxaad kaloo codsan kartaa in boosta laguugu soo diro warqadda codbixinta maqanaha. Si aad u heshid xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama aad u codsatid warqadda codbixinta maqanaha, booqo [mnvotes.org](http://mnvotes.org)

### SHAQADA OO LAGAA FASAXO SI AAD U CODAYSO

Waxaad xaq u leedahay in shaqada lagaa fasaxo si aad u codayso, adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

*Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota*  
***[mnvotes.org](http://mnvotes.org) • 1-877-600-VOTE***